

MINNESOTA DEPT HUMAN SERVICES
PO BOX 64960
SAINT PAUL MN 55164-0960

Taariikhda: <Date>
Lambarka Kiiska: <Case
Number>

<First Name> <M> <Last Name>
<Street 1>
<Street 2>
<CITY> < STATE> < ZIP>

Macluumaad Muhiim ah oo ku saabsan caymiskaaga Medical Assistance.

Sharciga federaalka ayaa beddelaya shuruudaha u-qalmiitanka ee dadka qaar ee hela caymiska Medical Assistance. Isbeddeladani waxay saameynayaan oo keliya dadka ku qoran caymiska Medical Assistance ee ah dad waaweyn oo aan haysan carruur ku tiirsan, isla markaana ah:

- Da'doodu tahay 21 ilaa 64 sano,
- Aan la noolayn carruurtooda ka yar 19 sano,
- Aan uur lahayn, iyo
- Aan helin caymiska Medical Assistance sababo la xiriira naafo.

Diiwaankeenna wuxuu muujinayaa in aad ku jirto kooxdan dadka ku qoran caymiska Medical Assistance, isla markaana ay ku saameyn doonto isbeddelladan.

Maxaa Isbeddelaya?

- **Cusboonaysiin soo noqnoqata:** Kadib marka aad cusboonaysiinta sameyso 2027, u-qalmiitankaaga caymiska Medical Assistance waa in la cusboonaysiiyaa lixdii biloodba mar halkii uu ahaan lahaa sanadkiiba hal mar. Haddii aad tahay Hindida Mareykanka ama qof u dhashay Alaska (Alaska Native), cusboonaysiinta caymiskaaga Medical Assistance waxay weli ahaan doontaa sanadkiiba hal mar. Waxaan kuu soo diri doonnaa ogeysiis marka la gaaro waqtiga cusboonaysiinta caymiskaaga Medical Assistance.
- **Shaqo ama ka-qaybgalka bulsho:** Laga billaabo Janaayo 1, 2027, waa inaad buuxisaa shuruudaha shaqo ama ka-qaybgalka bulsho qaarkood si aad u sii haysato caymiskaaga Medical Assistance, haddii aan lagaa dhaafin shuruudahaas. Waad lagaa dhaafay shuruudahan haddii aad tahay Hindida Mareykanka ama Dhaladka Alaska.

Maxay yihiin shuruudaha shaqada ama ka-qaybgalka bulshada?

Shuruudaha shaqada ama ka-qaybgalka bulshada waa hawlo aad u baahan tahay inaad qabato si aad u sii haysato caymiskaaga Medical Assistance. Hawlaha la aqbalo waxaa ka mid ah:

- Ka shaqaynta shaqo ama ganacsi kuu gaar ah
- Aadista iskool ama tababar xirfadeed
- Ka qaybgalka barnaamij shaqo
- Iskaa wax u qabso

Si aad u buuxiso shuruudahan, waa inaad ku bixisaa ugu yaraan 80 saacadood bishii mid ka mid ah

hawlahaan, ama aad ku jirtaa iskool ama tababar xirfadeed ugu yaraan nus-waqtii maalinkii. Waxaad sidoo kale isku dari kartaa hawlaha kala duwan si aad u gaarto wadarta 80 saacadood bishii.

Waxaad sidoo kale buuxin kartaa shuruudaha haddii dakhligaaga guud (mid la kasbaday iyo mid aan la kasban) uu yahay \$580 ama ka badan bishii, iyadoo aan loo eegin inta saacadood ee aad shaqaysay.

Yaa laga dhaafay shuruudaha ka-qaybgalka shaqada ama bulshada?

Waxaa laga yaabaa in lagaa dhaafo buuxinta shuruudaha shaqada ama ka-qaybgalka bulshada haddii aad tahay:

- Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska
- Daryeele qoys oo daryeela qof naafo ah
- Askartii hore oo leh naafo si buuxda loo qiimeeyay
- Qof qaba xaalad caafimaad oo daran, adag, ama mid joogto ah, ama si joogto u qaata daaweyn ama daawo (tusaale ahaan, caafimaad ahaan tabar darran)
- Qof buuxiya shuruudaha shaqada ee Barnaamijka Maalgashiga Qoyska ee Minnesota (MFIP)
- Xubin ka mid ah qoyska oo hela kaalmada nafaqo ee Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP) isla markaana aad ku hoos jirto shuruudaha shaqada ee kaalmada SNAP
- Qof ka qaybgalaya barnaamij daaweynta daroogada ama khamriga iyo dhaqan-celin balwad
- Qof hadda ku jira xabsi ama jeel
- Qof dhowaan laga sii daayay xabsi ama jeel (saddexdii bilood ee la soo dhaafay)
- Qof daryeel caafimaad ka helaya cisbitaal, xarun daryeel, isbitaal dhimir, xarun dadka qaba naafada dhanka garaadka ah, ama daryeel la mid ah
- Qof u safraya meel ka baxsan deegaankiisa si uu u helo daryeel caafimaad naftiisa ama qof uu mas'uul ka yahay

Xaggee ka heli kartaa macluumaad dheeraad?

Booqo: <https://mn.gov/dhs/federalchanges/work-requirements/> ama isticmaal lambarka QR koodka si aad:

- U barato wax badan oo ku saabsan sida aad u buuxin karto shuruudaha shaqada ama ka-qaybgalka bulshada, ama sida aad ugu qalmi karto in lagaa dhaafo shuruudaha.
- Inoogu sheegtid sida aad filayso inaad u buuxin doonto shuruudaha shaqada ama ka-qaybgalka bulshada, ama sida aad ugu qalmi karto in lagaa dhaafo shuruudaha. Bixinta macluumaadkan hadda waxay naga caawin doontaa inaan u diyaar garowno habka wax cusboonaysiintaada ee 2027.



Maxaa xiga?

Looma baahna inaad buuxiso shuruudaha shaqada ama ka-qaybgalka bulshada marka aad cusboonaysiinayso 2026. Waxaan ku dabaqi doonnaa shuruudahan marka la gaaro waqtiga cusboonaysiinta caymiska Medical Assistance ee 2027. Cusboonaysiintaas markii la gaaro, waxaan hubin doonnaa inaad buuxisay shuruudaha ama aad u qalantay in lagaa dhaafo ugu yaraan hal bil tan iyo cusboonaysiintaadii ugu dambeysay.

Xaggee ka heli kartaa caawimaad?

Waxaad heli kartaa caawimaad bilaash ah oo ka timaadda qof hage ah. Booqo <https://www.mnsure.org/help/find-assister/index.jsp> si aad u hesho hage ku dhow deegaankaaga.